Somaliska
Ungdomar

Dhallinyarada

17ka sebteembar oo ku aadan maalinta doorashada, waxaa go'aan laga gaari doona mustaqbilka dalka Iswiidan, xilkaasuna wuxuu saaran yahay adiga iyo aniga ba. Dhammaanteenna waxaa dusha naga saaran isla xilkaas. Codkaaga iyo kayga waa isku qiimmo. Haddaba miyaan kor u qaadna horumarka heerka sare ah, mise hoos ayaan u dhigna, anagoo karoonka shanaad ee canshuurta ka saarno khasnadda aanu wadajirka u leenahay? Miyaan horumarinaa hab-noleedka dalka Iswiidan – mise dusha ayaan u dhignaa?

Qof aanan doonaayn fursad u ku nolaado nolol fiican ma jiro, dhallinyaraduna ummadaas ayee ka tirsan yihiin. Da'yarta waxay doonayaan – xaqna ku lee yihiin – horumar iyo badbaadin. Sidaas awgeed, haddii aanu nahay xisbiga socialdemokratiga waxaan qabna in ay muhim tahay siyaasada dhallinyarad ee culus.

Maanta waxaa jiro da'yar tiro badan oo an isku filnayn. Haddii da'yarku u dugsiga shahaado fiican ka haysan, hab fudud shaqo kuma helaayo. Shaqo la'aanta-na waxay keenta in hab fudud dhibaato ula kulmaan ama cudur u ku dhaco. Haddii qofku usan qabin dhaqaale ma heli karo hoy u gaar ah. Waxaan doonayna in an arrintaas wax ka qabano. Dalka Iswiidan ma awoodo in farahiisa ay ka baxaan awooda da'yarta.

Arrinta ugu muhimsan ayaa waxay tahay in dhallinyarada la siiyo fursad ay laf ahaantooda ugu qaybqaatan go'aamada. Haddii aanu nahay xisbiga socialdemokratiga, waxaan hab firfircoon ugu dadaalna in an kordhino tirada da'yarta ee leh awooda go'aan gaarida. Haddaba sida an uu nuuxnuuxino ka qaybqaadashada dhallinyarada ee doorashada xilliga dayrta, waxay dowladda xisbiga socialdemokratiga go'aamisay in la fuliyo doorashada dugsiyada, taaso lagu fulin doono dugsiyada dalka oo idil.

Haddii aad u baahan tahay warbixin dheeraad ah mise aad dooneeyso inaad xubin ka noqoto xisbig aocialdemokratiga, booqo hoyga Internetka ee socialdemokratigana.se mise wac taleefanka 08-700 27 27

Waxbarashada

Waxbarashada waa xaq aanan laga doodi karin. Cidna laguma qasbin karo innuu joojiyo waxhbarashada dugsiga sare, isago aanan dhamaysan waxbarashadiisa. Sidaas awgeed, dugsiyada waxay u baahan yihiin awood dhaqaale oo dheeraad ah. Ardayda dhigata barnaamijka iyaga u gaarka ah waa in ay dhigtaan wakhti buuxa. Waa in la sii hagaajiyaa barnaamijyada gogoldhigga xirfadaha ee dugsiyada sare. Waxaan abuuri doona tababarro cusub, taaso kordhin doonto aqoonta xitaa markii qofku u shaqaynaayo. Teeda kale, ardayda dhigata dugsiyada sare waxaa la siin doona 100 karoon oo dheeraad ah – deeqda waxbarashada. Boosaska dugsiyda sare waxaan ku kordhin doona boosas tiradooda gaareeyso 17 500, taaso iyadana kordhin doonto tirada ardayda doonayaan in ay wax ku bartaan jaamacadaha.

Shaqada

Ummadda dhammantood waxay xaq ku lee yihiin shaqo iyo mushahar ku filan nolol-maalmeedkooda. Maanta da'yar tiro badan lama siiyo fursad ay shaqo ku helaan. Sidaas awgeed, ayaan waxaan ku dhaqaaqnay muruqgelin oo ah sidii shaqo ay ku heli lahaayeen. 100 maalmood ka badan raali ka ma nihin in qof da'yar ah u shaqo la'aan ku sugnaado. Waxaan hirgelinay taageero shaqo qorid oo dheeraad ah ee an ugu talagalnay dhallinyada muddo dheer shaqolaawe ahaa. Maamulada degmooyinka waxaa berri hore lagu wareejiyay xil ay ku kormeeraan oona hawl ugu yeelaan dhallinyada shaqada la'. Xafiiska shaqada waxaa lagu amray in hab firfircoon oona daahid lahayn u la socdaan xaaladda dhallinyada shaqada la'.

Hoyga

Da'yar tiradooda badana ayaa waxay la kulmaan dhibaatada helida hoy iyaga u gaar ah. Ma wanaagsanaa haddii hoy helida ay ku xiran tahay awood dhaqaleeka. Sidaas awgeed, waxaan ku dadaalna in la kordhiyo tirada dhismaha aqalada qiimo jaban lagu kireeysan karo iyo kuwa aradayda ba, kuwaaso da'yarta ay awoodan in ay kireeystan. Shirakadaha aqalada kireeyo waxay dhallinyarada badi ahaan ku xujeeyaan in shaqo joogto ah ay haystaan, taaso ah shuruud xayreeyso helida hoyga ee dhallinyarada. Kadib markii maamulka degmooyinka ay helaan kaalmo qarmeed, ayaan waxaan doonayna in maamulka degmooyinka uu ballanqaado in dayarku uu kirada bixin doono. Anagu raali ka ma nihin aqallo gaar ahaan dhallinyarada loogu talaggaly, kuwaao heer hooseeya ama ku yaala goobo aanan wanaagsanayn.

Caafimaadka iyo xilliyada fasaxa

Tirada dhallinyarada dareema kadeediska maalinba maalinta ku xigta ayee sare u kacda. Caafimaadxummada nafsiga ayaa sare u kacday. Siiba waxay saamaysa gabdhaha da'da yar. Haddii aanu nahay xisbiga socialdemokratiga waxaanu dooonayna in an kordhinno awood dhaqaaleedka xarumaha lagu daryeelo caafimaadka nafsiga ee carruurta iyo dhallinyarada. Waxaanu doonayna in la kordhiyo tirada goobaha dhallinyarada ay ku kulmaan xilliyada fasaxa, kuwaaso

dhallinyarada u suurtagelineeyso in ay yeeshaan xilli fasax xiiso leh ee laguna raaxaysto. Waxaa kalo talo naga ah in la xoojiyo hawlaha lagu ilaaliyo caafimaadka ardayda dugsiyada.

Wax ku bediladeeda
Siyaasadayda waxaa ka soo horjeeda siyaasadda isbahaysiga midigta ee xisbiga moderaterna u hogaamiyo. Xisbiga moderaterna wuxuu doonayaa in hoos loo dhigo shuruuda una kordhiyo kala socida dugsiyada. Waxay doonayaan in la ciribtiro barnaamijka gaarka ah ee dugsiyada sare, kuna dirqiyaan 17- iyo 18-jiryada in ay sii dhigtaan dugsiyada biloowga hoose iyo dhexe. Waxay doonayaan in ay hoos u dhigaan himilada ardayda dhigata barnaamijka gogoldhigga xirfada. Waxay doonayaan in sii xumeeyaan siyaasada suuqa shaqada, sidasna dhallinyarada tiro badan ku qasbaan shaqolaawenimo.

Xisbiga centerpartiet wuxuu soo jeediyay talo ah in dhallinyarada da'dooda ka hooseeyso 26 sano ah shaqada laga laga fadhiisin karo digniin la'aan. Dalka Fransiiska ayaa dad tirodooda badan, da'yar iyo da'weyn ba, u soo baxay banaanbaxyo ay ku muujinayaan in ay ka soo horjeedaan qorsheha noocasi ah. Iyadoo sidaasi tahay, ayuu haddana xisbiga Centerpartiet doonaya innu nidaamka noocasi ah dalka Iswiidan laga hirgeliyo.

Siyaasadda xisbiga moderateratiga waxay ku dhisan tahay in hoos loo dhigo fursada dhallinyarada ay ku heli lahayeen hoy iyaga u gaar ah. Waxay doonayaan in ay ciribtiraan kaalmo-dhaqaaleedka qarmeed ee lagu dhisi lahaa aqalada qiimaha jaban lagu kireeysan lahaa iyo aqalada ardayda. Waxay kalo doonayaan in ay ciribtiraan kaalmo dhaqaaleedka kirada ee la siiyo dhallinyarada aanan carruurta lahayn ee da'dooda ka hooseeyso 29 sano. Arrimahaaso idil waxay hoos u dhigayaan fursada dhallinyarada ay ku yeelan lahaayeen nolol madaxbanaan.

Dalka Iswiidan anagu aanu maamuli doono waa loo dhan yahay, adigu-se dalkee dooratay?